IIB MA GALO

# FAADIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Moqadisho, 20 Setembere 1975. | L.2 R 9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA | جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L.53, Tr. 1 Agoosto 1975, — *Dhismaha Sicirka Sonkorta Warshadda Johar.* Bog 702

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 8 Set. 1975, L. 134 — *Xeer habeynta dhismaha cusub ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha* » 703

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 8 Set. 1975, L. 135 — *Magacaabid Guddoomiyeyaasha Gobollada Jubada Dhexe Gedo iyo Shabeelaha Dhexe* » 708

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA Tr. 7 Set. 1975, L. 136 — *Magacaabid Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Nugaal qaybahooda Wakiillada Beesha* » 709

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED Tr. 3.8 1975, L. 137 — *Xeerka Sarrifka Lacagta Qalaad* » 711

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED Tr. 10.8. 1975, L. 138 — *Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad* » 712

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED Tr. 1.9. 1975, L. 139 — *Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad* » 713

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD Tr. 6.9.1975, — *Naada Dhul, Jaalle Safuya Sheekh Cali (184)* *Bog 714*

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE Tr. 30 Agoosto 1975, — *Lumid Jeegga wareega L. 29056 ee Shs. 1.255 uu leeyahay Jaamac Sugulle Saalax (185)* » *714*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 15.9.75.— *lumid Buugga Lacagta L. 762/74 Shs. 14.528, uu leeyahay Cusmaan Aadan Axmed (186)* » *715*

FIYAAT SOOMAALIYA S.P.A. Hantida Sharikadda Sh. So. 1.700.000.00 *Ogeysiiska isu imaatinka ee Shirka Guud ee Caadiga ah iyo kan Caadiga aan ahayn (187)* » *715*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 20.4.75, —

*Dhumid Buugga Lacagta L. 8279 Sh.So. 302 U leyahay Shariif Xasan Xuseen (187 Bis)* » *716*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 27.9.75, —

*Dhumid Jeegga Wareega L. 18382, Sh.So. 1.000*

*U leyahay Xaaji Axmed Ciise (187/Bis)* » *717*

# BOGGA KOWAAD

# S H A R C I

SHARCI L. 53 Tr. 1 Agoosto 1975.
Uj. Dhismaho sicirka sonkorta Warshaddo Johar.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Ogolaashaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

UWXU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Laga bilaabo taariikhda u sharcigani dhaqangalo dhismaha sicirka sonkorta Warshadda Johar wuxu noqonayaa sida ku qoran lifaaqa «A» oo sharcigan ka mid ah;

Qod. 2

Sharciyadii kan ka horreeyey ee ku saabsanaa dhismaha sicirka sonkorta Warshadda Johar waa la baabiiyey;

Qod. 3

Sharcigani wuxu dhaqangalayaa 1 da Agoosto, 1975, waxana lagu soo saari doona Fafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

LIFAAQA «A»

DHISMAHA SICIRKA SONKORTA WARSHADDA JOHAR

| | | |
|---|---|---|
| Qiimaha Warshadda lagu siinaayo | Sh.So. | 170.00 |
| Cashuurta Dawladda | » | 242.05 |
| Kharashka Gaadiidka Wakaaladda Ganac. Ummadda | » | 18.55 |
| Kharashyada kale | » | 4.40 |
| Kharashka Gaadiidka ee Dawladda Hoose | » | 3.00 |
| Kharashyada kale ee Dawladda Hoose | » | 2.00 |
| Tafaariiqlayda (Retailers) | » | 20.00 |
| Isugeyn | Sh.So. | 460.00 |

Muqdisho, 1.8.75

Guddoonshaha
Golaha Sare ee Kacaanka

# BOGGA LABAAD

# X E E R

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 8 Set 1975, L. 134**
**Xeer habeynta Dhismaha cusub ee Wasaaradda Arrimoha Gudaha.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo sharcigii 1aad ee soo baxay 1dii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambar 14 ee 3 junyo 1962 iyo beddeladdi ka dambeeyay kuna saabsanaa nidamka Dawladda;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha lamb. 316 ee 17 disembar 1962, kuna saabsan nidaaminta Xafiisyaha dhexe ee Maamulka Dawladda;

ISAGOO ARKAY Xeerka lamb. 21 ee 1.12.1962 ee ku saabsan dhismaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO AQOONSADAY In loo baahanyahay in la habeeyo, si Kacaanka mabaadii'diisa la socota, dhismaha iyo qaabka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Xafiisyada la xiriira, wuxuu xeeriyey;

ISAGOO TIXGELINAAYA Talada u soo jeediyay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

## Qod. 1

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyadoo raaceysa awaamirta iyo talooyinka Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxay ku shaqeyn doontaa hawlaha loogu xilsaaray sharciga lambar 14 ee 1962 iyo Dekreetada qeynuuniga ah (legislative Decree) lambarkeedu yahay 1 ee 7.2.1965 oo lagu sharciyay, qeynuunka lambar 4 ee 1 junyo 1965 ee ku saabsan Nidaaminta Dawladda (Organisation of Government) iyo hawlaha kale ee sharci ahaan loo xilsaaray Wasaaradda.

## Qod. 2

1. Agaasinka Guud iyo Agaasimayaashu waxay noqon karaa Saraan Saraakiil ka tirsan Ciidanka Qalabka Sida iyo Shaqaalaha Dawladda.

2. Agaasimaha Guud ee Wasaaraddu wuxuu ku camal fali doonaa qodobka 3aad ee xeerka dhismaha Maamulka Dawladda Dhexe (DPR

Qod. 3

Agaasin

Wasaaraddu waxay yeelanaysaa 4 Agaasin, iyo 2 Laamood iyo 1 Xoghayn:

1. Agaasinka Siyaasadda iyo Hanuuninta;
2. Agaasinka Bulshada iyo Qorsheynta;
3. Agaasinka Dawladaha Hoose;
4. Agaasinka Shaqaalaha iyo Nidaaminta.

1. Laanta (Sersive) Kormeerka;
2. Laanta (Service) Xisaabaadka

iyo

1. Xoghaynta Sirta.

Qod. 4

Agaasinka Siyaasadda iyo Hanuuninta

Agaasinka kor tilmaaman isagoo u hogaasan amarka Xoghayaha iyo Agaasimaha Guud, wuxuu qaabilsanaan doonaa hawlaha Wasaarddu loo xilsaaray ee ku saabsan:

1. Fulinta siyaasadda Kacaanka ee oranaysa xukunka waxaa iska leh dadweynaha meel kasta ha joogee iyadoo saldhig uu u yahay sharciga lambar 52 ee 1972 iyo xeerarka la xiriira ee ku saabsan aragtida garadka siyaasiga ah ee Ummadda Soomaaliyeed iyadoo lala kaashanayo Xafiiska Siyaasadda ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

2. Fulinta mabda'a siyaasiga ah ee ah in xukunka hoos loo dhaadhiciyo iyo Bulsho ka talisa aayantiinkooda sida uu oranayo sharciga lambar 52/72.

3. Talo bixinta dhismaha Guddiyada Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.

4. Xogwarranka ka yimaada Gobollada iyo Degmooyinka.

5. La socodka go'aanada fadhiyada Guddiyaasha Gobollada iyo Degmooyinka.

6. Isku xirka Wasaaraddaha kale iyo Wasaaradda (hawlahooda Gobollada iyo Degmooyinka).

7. Talo bixin isku hagaajiska soohdimaha Gobollada iyo Degmooyinka.

8. Arrimaha Guud ee ka yimaada Gobollada iyo Degmooyinka.

9. Wada shaqeynta Xafiiska Siyaasadda xagga xiriirka dadweynaha.

10. Talo bixinta iyo ka qabashada dhibaatooyinka dhulka iyo Beeraha.

12. La socodka arrimaha ka dhaca xadbeennaadka.
13. Maamulka bixinta iyo qaadista Jinsiyadda Soomaaliyeed.
14. Talo bixinta habka dhismaha magaalooyinka iyo Tuulooyinka.

Qod 5

Agaasinka Bulshada iyo Qorsheynta

Agaasinka kor ku tilmaaman isagoo raacayaa awaamirta Xoghayaha iyo Agaasimaha Guud wuxuu mas-uul ka noqon doonaa dhinaca idaariga ah hawlaha ku saabsan:

1. Fulinta Siyaasadda Kacaanka iyo Bulsho cusub loo abuuro oo ku dhisan hawl iyo Hantiwadaag oo kor loogu qaadayo dhaqaalahooda iyo noloshooda ijtimaaciga ah iyadoo himiladu tahay isku filaan, (wax barashada guud).

2. Fulinata qorsheyna barnaamijka dhaqaalaha iyo harumarinta Bulshadaha Wasaaradda la xiriira.

3. Habeynata iyo fulina Mshaariicda iskaa wax u-qabso ee Gobollala iyo Mashaariicda iyo cunnada W.F.P.

4. kayd haynta iyo qeybinta cunnada W.F.B. iyo tan gaar ahaaneed.

5. Isku dubbaridka Xarumaha Dhallinta Kacaanka Rugta Beesha, Dugsiyada Dhaqaalaha Guriga iyo Xannaanada Carruurta.

6. Kormeeridda Barnaamijyada horumarka kor ku sheegan.

7. Qabanqaabinta ciyaaraha Gobollada iyo Degmooyinka, iyadoo la tixgelinayo talooyinka Wasaaradda Isboortiga.

8. Iskuduwidda Iskaashatooyinka dhinaca sharciyeenta, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda ku shaqi leh.

9. Gargaarka abaarta iyo dhibaatooyinka kale.
10. Isku dubarridka hawlaha Carwada Gobollada iyo Degmooyinka.
11. Wixii kale la xiriira hawlaha kor ku magacaaban.

Qod. 6

Agaasinka Dawladaha Hoose

Agaasinka kor ku tilmaaman isagoo raacaya awaamirta Xoghayaha iyo Agaasimaha Guud wuxuu mas-uul ka noqon doonaa hawlaha ku saabsan:

1. Habeynta iyo Iskuduwidda Miisaaniyadda Dawladaha Hoose.
2. La socodka isbeddelka cashuuraha Dawladda Hoose.
3. Ilaalinta dhakhliga iyo kharashka Dawladaha Hoose.
4. Qorsheynta iyo horumarinta biyaha iyo nalka, Gobollada iyo Degmooyinka.

5. Maamulka korontada iyo Biyaha.
6. Maamulka (Anagrafia): Dhalashada, Dhismashada, Nikaaxa, Fu-

7. Maamulka Caafimaadka Dadka iyo Xoolaha reer Miyiga, iyadoo lala Kaashanayo Wasaaradda Caafimaadka.

8. Maamulka Xarumaha Kacaanka iyo Nafaqeynta Hooyada iyo carruuraa, iyadoo lala kaashnayo Xubnaha Dawladda oo ku shaqada leh.

9. Maamulka iyo Xisaabinta Wakaaladaha Ganacsiga Degmooyinka. oo ka kooban cunno, dawo dadka iyo Xoolahaba iyo wixii kale ganacsiya oo ku soo biira dawladaha Hoose.

10. Xiriirka ka dhaxeeya Dawladaha Hoose iyo Wasaaradaha dhinaca khuseeya hawlaha kor ku dhigan.

11. Amargooyada Dawladaha Hoose la socodkooda.

## Qod 7

Agaasinka Shaqaalaha iyo Nidaamka

Agaasinka kor ku tilmmaaman isagoo u hoggaansan amarka Xoghayada iyo Agaasimaha Guud, wuxuu mas-uul ka noqon hawlaha hoos ku qoran:

1. Habeynta iyo Iskuduwidda maamulka shaqaalaha Dawladda. Dhexe iyo Dawladda Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka.

2. Xannanada shaqaalaha iyo dayac tirkooda.
3. Talo bixinta dallacaadooda iyo asluubtooda.
4. Talo bixinta kala bedelkooda iyo fasaxyadooda.
5. Xogwarranka sannad walba laga qoro shaqaalaha iyo ka gaar ahaaneed.

6. Tababarka shaqaalaha, mid farsamo, xafiisyada iyo xisaabaadka.
7. Nidaamka iyo isku-duba-ridka hawlaha Xafiisyada sare ee Wasaaradda.

## Qod 8

Laanta (Service) oo Agaasimada .

Agaasimadu lagu tilmaamay qodobka 4, 5, 6 iyo 7aad waxey yeelanayaan Laamo (Service) iyo Xubno (Section) hoos yimaada, waxayna yeelanayaan shaqaale u gaar ah.

## Qod 9

Laanta (Service) kgrmeer.

Laana kor ku sheegan waxay mas-uul ka noqon doontaa hawlaha hoos ku qoran waxayna hoos imanaysaa Agaasinka Guud:

1. Kormeer guud iyo mid gaar ahaaneed, si loo hubiyo in Gobola-du iyo Degmooyinku ay fuliyeen Sharciyada iyo Wareegtooyinka Madax-

2. Kormeer xisaabeed, si loo xaqiijiyo hantida Ummadda Soomaaliyeed in si habsami ah looga maamulo Gobolada iyo Degmooyinka oo mas-uul ka ah Miisaaniyadda Dawladda hoose iyo Ganacsiga Degmaayinka.

3. Ugu yaraan sannadkii in Laantu Kormeerto Gobol walba laba goor.

Qod 10
Laanta (Service) Xisaabaadka.

Laantani waxay toos u hoos imanaysaa Agaasinka Guud waxayna masuul ka noqon doonaaa hawlaha lagu magacaabay hoos,

1. Habeynta miisaaniyadda iyo kharashka Dawladda Dhexe ee Wasaaradda ee caadiga ah iyo ta horumarinta.
2. Mushahaarka Shaqaalaha iyo gunnadoodu.
3. Kharashka gargaarka abaareed iwm.
4. Xisaabaadka iskaa wax u qabso.
5. Xisaabaadka harumarinta mashaariicda Bulshada cusub.a
6. Maamulka Badroolka iyo shidaalkooda.
7. Xafaaska (arkiifiyada). Xoghaynta caadiga ah iyo shaqaalaheedu.

Qod 11

Xoghaynta Sirta

Xoghaynta Situ waxay toos u hoos imanaysaa Agaasinka Guud, waxayna masuul ka noqon doontaa, hawlaha iyo Iskuduwidda warqadaha sirta iyo qarsoodi ah oo dhan ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Qod 12
Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka.

Gobollada iyo Degmooyinka waxay leeyihiin Guddoomiyaal oo madax u ah Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka.

Qod 13

Wixii xeer ah ee ka hor imanaya aan la socodsiin Xeerkan waa la tirtiray.

Qod 14

Xeerkanu wuxuu hirgelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha G.S.K. waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Set. 1975

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(S Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 8 Set. 1975 L. 135**
**Magacaabid Guddoomiyeyaasha Gobollada Jubada Dhexe, Gedo iyo Shabeelaha Dhexe**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 7aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 52/72, soona baxay 8dii juun 1972kii;

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahaa XGM/GSK-13-630 iyo XGM/GSK-4-667, taariikhdooduna ahayd 18 iyo 31-8-1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, kuna saabsanaayeen magacaabid iyo beddelaad Guddoomiyeyaal Gobol;

ASAGOO TIXGELIYEY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyaal Gobollada Jubada Dhexe, Gedo iyo Shabeelaha Dhexe.

WUXUU GOOYEY
Qod 1

Laga billaabo bishii agoosto 18dii iyo 31dii, 1975ka, waxaa lagu magacaabay Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin inay Guddoomiyeyaal ka noqdaan Gobollada hortooda ku qoran:

1. Jaalle Gaashaanle Axmed Maxamed Ciise «Ilgiir» — Guddoomiye Gobolka Jubada Dhexe;
2. Jaalle Xasan Xaaji Cilmi — Guddoomiye Gobolka Gedo;
3. Jaalle Gaashaanle Sare Maxamed Sheekh Cabdullaahi — Guddoomiye Gobolka Shabeelaha Dhexe.

Qod 2

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa si degdeg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8.9.1975.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*Saxiix. S.Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*Sx. S.Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

VISTO E REGISTRATO
Reg. 4 foglio n. 202 Mog. 17 Set. 1975
IL SOSTITUITO MAGISTRATO
AI CONTI — F. to
*Jaalle M.C. Faarax*

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA DIBEDDA**
**Tr. 7 Set. 1975, L. 136**
**Magacaabid Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Nugaal qaybahooda Wakiillodo Beesho.**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;
ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972, qodobka 10naad (xaraf c);
ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 12125 - 12126 ee 13.12.72 ku saabsan magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Garoowe - Eyl iyo Laas - caanood;
ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, taariikh 8.2.1973kii ee lagu dhisay Gobollada Nugaal, Shabeelaha Dhexe iyo Shabeelaha Hoose;
ISAGOO OGAADAY: Iney lagama maarmaan tahay in cusbooneysiiyo magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Garoowe, Eyl, Laas - caanood iyo Taleex, iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran qodobka 10aad lambarkiisu 3aad, xarafka (c) ee sharciga ku tilmaaman;
ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Nugaal.

WUXUU XEERAY

Qod 1

Magacyada Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Garoowe, Eyl, Laas - caanood iyo Taleex, qaybahooda Wakiillada Beesha.
Ka bilaabanta 20.10.1974kii, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

Dedmada Garoowe.

1. — Jaalle Faadumo Sareed Maxamed;
2. — » Cismaan Ciise Axmed;
3. — » Shiikh Cabdiraxmaan Ciise;
4. — » Ismaaciil Cali Axmad;
5. — » Maxamad Axmad Aaarax;
6. — » Cabdulle Aadan Axmad;
7. — » Jawaahir Xaaji Xuseen;
8. — » Axmad Maxamad Faarax;
9. — » Xirsi Cali Ciise;
10. — » Cali Saciid Yuusuf;
11. — » Shiikh Axmad Xaaji Yuusuf;
12. — » Ciise Cabdulle Muuse;

14. — » Xuseen Geele Saciid;
15. — » Maxamad Daarood Yuusuf;
16. — » Maxamad Cabdi Geelle;
17. — » Xaawo Yuusuf Ismaaciil.

Degmada Eyl

1. — Jaalle Salaad Axmed Guuleed;
2. — » Xidde Guureeye Kaarshe;
3. — » Maxamed Cabdi Xaaji Nuur;
4. — » Cabdishakuur Xaaji Cabdulle;
5. — » Xaaji Muuse Ciise;
6. — » Xaaji Ciise Xasan;
7. — » Maxamed Aw Faarax Muuse;
8. — » Maxamed Cige Abokor;
9. — » Salaad Cabdulle Bayle.

Degmada Laas - caanood

1. — Jaalle Jaamac Faarax Maxamed;
2. — » Maxamed Ismaaciil Axmed;
3. — » Maxamed Faarax Ducaale;
4. — » Faarax Maxamuud Muuse;
5. — » Cabdillaahi Diiriye Maxamed;
6. — » Maryan Ciise Cabdi;
7. — » Macalin Ibraahim Faarax Wayd;
8. — » Yuusuf Cilmi Ciid;
9. — » Sheekh Maxamed Cumar.

Degmada Taleex

1. — Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Muuse;
2. — » Saalax Xaaji Cali Shire;
3. — » Xaaji Jaamac Cabdulle Axmed;
4. — » Cali Macalin Maxamed;
5. — » Amina Xasan Maxamed;
6. — » Cabdi Maxamuud Cali;
7. — » Cali Axmed Jaamac;
8. — » Warsame Cabdulle Maxamed;
9. — » Abshir Xaaji Diiriye Maxamed.

Qod 2
Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelyaa ka bilaabanta 20.10.1974ka, waaxna in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 7.9.1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED**
**Tr. 3.8.1975, L. 137.**
**Heerka Sarrifka Lacagta Qalaad**

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddammada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON In horay loo qaaaty go'aan deg deg ah Lr. 186 ee 03.08.75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26.11.68 uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu haatan ahaan doono sida hoos ka muuuuqata, laga bilaabo 03.08.1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| LACAGTA QALAAD | | HEERKA IIBSASHADA OO SH. SO. AH | HEERKA GADIDDA OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 13.6742 | 13.9477 |
| DM. | 1.00 | 2.4625 | 2.5118 |
| LIT. | 105.60 | 1.0000 | = |
| LIT. | 103.49 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.4451 | 1.4740 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.3441 | 2.3910 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 03.08.1975

*Saciid Maxamed Cali*
Agaasimaha Guud

Cumar Axmed Cumar

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED**
**Tr.10. 8. 1975, L.138**
**Heerka Sarrifka Lacagaho Qalaad.**

AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr 27 ee 26kii Nofeembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu marwalba caddeeyo qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Ohawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddammada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In 1 adhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 187 ee 10.08.75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr.27 ee 26.11.68 uu dhigayo.

WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga A - H, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 10.08.75, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaya.

DJ.FR. 1.00 0.03525 0.03596

| LACAGTA QALAAD | | HEERKA IIBSASHADA OO SH. SO. AH | HEERKA GADIDDA OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 13.4007 | 13.6687 |
| DM. | 1.00 | 2.4256 | 2.4741 |
| LIT. | 106.67 | 1.0000 | = |
| LIT. | 104.54 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.4306 | 1.4592 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.3089 | 2.3551 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 10.08.1975

Agaasimaha Guud

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED**
**Tr. 1.9.1975, L. 139**
**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

## AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofeembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8. ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu marwalba caddeeyo qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagna lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddammada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaaalha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 188 ee 01.09.75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Lr. 27 ee 26.11.68 uu dhigayo.

### WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu haatan ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 01.09.75, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| LACAGTA QALAAD | | HEERKA IIBSASHADA OO SH. SO AH | HEERKA GADIDDA OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 13.1997 | 13.4637 |
| DM. | 1.00 | 2.4256 | 2.4741 |
| LIT. | 106.67 | 1.0000 | = |
| LIT. | 104.54 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.4306 | 1.4592 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.3089 | 2.3551 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 01.09.75

Agaasimaha Guud

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Safuya Sheekh Cali maalintii 10.3.74 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaaq - Shiid Jidka Ummadda uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rektangolar addimihiisuna ahaayeen 33×30 kuna fadhiye 990/L mdh, sababtoo ah in la beddelay naqshadii hore iyo meeshii ay ailmaameysay:-

Sidaa aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3.23.74 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sda hoos ku tilmaaman:-

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin - karo jaallahaas qaabkiisu waa trabeesiyo addimihiisu yihiin 40+16×30 kuna fadhiya 840/=mdh.

Soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO;
Koofur waxaa ka xiga: WADDO;
Galbeed waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 29 iyo 33;
Bari waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 29 iyo 33.

Muqdisho 6 Set, 1975.

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

(184) *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

WAXAAN ARKAY DACWADAN:

MARKAN ARKAY Waxay ku saabsan tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda Soomaalidda Laanta Kismaayo, ee aan ogaaday in ay tahay Shaqa Xafiiskan;

MARKUU ARKAY Qodobka 69 D.L. 9.9.65 n.2;
Waxaana caddeeynayaa dhumidda Jeeg wareegto L.29056 ku qoran lacag dhan 1.255/= (Kunlababoqoolkontoniyo= shan Shs.) Shs.

WAXAAN AMRAYAA In loo cusbooneysiyo Jaamac Sugulle Saalax muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo Jeegaas Sheegtaa.

WAXAAN KALOO La caddeeynayaa in Jeegaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sitaa Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo, 30 Agoosto 1975

GUDDOOMIYAHA
MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

(185) [illegible]

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Hadduu arkay dacwada kor ku qoran;
Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiskii Bankiga ganacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa.
Hadduu arkay Qod. 69 D.L. 9.9.65 N.2;

WAXAAN CADEYNAYAA

Lumidda buugga Lacagta (ammortamento libretto) NDR L. 762.74 kuna qoranayd lacagta Shs. 14.528. (Afar - iyo tobankunshanboqol - labaataniyo siddeed) shilin uu leeyahay Jaalle Cusmaan Aadan Axmed, waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninka layirahdo Cusmaan Aadan Axmed muddo 30 beri ah, laga billaabo Maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda haddii aan qof kale wax ku soo sheegan buug la cageed.

Waxaa kaloo la codsanayaa in buuggaas gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof ka sita wakaalad sharci ah isla ninkaas ayadoo la sugaayo soddonkaas beri ee kor lagu soo sheegay.

Muqdisho, 15.9.75.

Garsooraha Maxkamadda G.
*Dr. Cabdullahi Daahir Barre*

*(186)*

---

FIYAAT SOOMAALIYA S.P.A.
Hantida Shirkadda Sh.So. 1.700.000.00

—M U Q D I S H O —

Ogeysiiska siu imatinka ee shirka Guud ee Caadiga ah iyo kan Caadiga aan ahayn.

Waxaa la ogeysiinayaa dadka sahmiga ku leh Shirkadda Fiyaat Soomaaliya S.P.A. markay taariikhdu tahay 19ka Oktoobar saacaduna tahay 9ka, isu imaatinka hore, iyo markay taariikhdu tahay 20ka Oktoobar isla 9ka saac, isu imaatinka 2aad, lagu qaban doono Xarunta Shirkadda oo ah Muqdisho Shirka Guud ee Caadiga ah iyo kan Caadiga aan ahayn ee Sahmiyeyaasha (Azionisti) Shirkadda si looga doodo ajendada soo socota:

Qaybta Caadiga ah

1. Magacaawidda Guddiga Baarista ee cusub;
2. Iyo waxyaalo oo kale (Varie ed Eventuali)

Qaybta aan Caadiga ahayn

1. Kordhinta Hantida Shirkadda iyo wax ka beddelidda Qod. 5aad ee Xeerka (Statuto);

2. Dheereynta muddada Shirkadda ilaa 31ka Diisembar 2000 iyo wax ka beddelidda Qod. 3aad ee Xeerka.

Muqdisho, 28ka Settembre 1975.

Guddiga Maamulka
*(Dott. Luigi Terenzio)*

*(187)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Hadduu Arkay dacwadda kor ku qoran,
Markuu arkay waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiskii Bangiga ganacsiga Soomaaliyeed. wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisu.

Hadduu Arkay Qod.69 D. 9 .9 .6 5 N. 2.

Waxaan Caddeynayaa

Lumidda Buugga Lacagta (Ammortamento libreto) NDR 8279 ee Shs. 302/= (saddexboqoliyolabo) shilin,

Waxaan amrayaa

In loo sameeyo Buugga Ninka la yiraahdo Shrariif Xasan Xuseen Ibraahim. Muddo 30 beri ah, laga bilaabo Maalinta lagu shaaciyo faafinta Rasmiga ah ee Dawladda haddii aanan qof kale wax ku soo sheegan Buug lacageed.

Waxaa kaloo la codsanayaa in Buuggaas gacanta laga saaro Ninka Magaciisu kor ku qoran yahay ama qof ka sita Wakaalad Sharci ah isla Ninkaas iyadoo la sugaayo Soddonkaas beri ee kor lagu soo sheegay.

Xamar, T.20.4.75

Maxkamadda Gobolka Banaadir

Hadduu arkayqoraalka hor ku qoran;
Hadduu arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo warqaddi Bankiga Ganacsiga Ummadda, Laanta Koowaad ee lam. 10.533 wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

Hadduu arkay qod. 69 D.L. 9.9.65 n.2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda jeegga wareega ee lam. 18382, kuna qornayd lacag tiradeedu tahay Shs. 1.000/= (Kun/=) iskana Jaalle Xaaji Axmed Ciise, sida ku cad warqadda Bankiga ee kor ku tilmaaman:-

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneeyo Jaallaha kor ku magacaaban jeegii ka lumay, ama mid cusub loo sameeyo, 15 beri ka dib amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Xaaji Axmed Ciiso, ama isla asaga wakaalad Sharci ah ka sito, ayadoo la sugaayoo 15ka beri ee kor lagu soo sheegay:-

Xamar 27.9.75

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*(187 Bis)* *Cabdullaahi Daahir Barre*